



Grannsamverkan

Neighbourhood watch

Waa bilaash inaad ka qayb qaadatid wada shaqeynta
ama ilaalinta Xaafada (Grannsamverkan).
Si aad u ogaato wax badan, la xiriir booliska degmadda,
maamulka degmadda ama shirkaddada caymiska.

Waxaad sidoo kale oo aad wax badan ka ogaan kartaa:
www.grannsamverkan.se

Maalgaliyeyaasha iyo wada-hawlgalayaasha



Dina
Försäkringar



**Wax ku saabsan
ilaalinta ama
wadasheqaynta
Xaafada**



Grannsamverkan
Neighbourhood watch

Ka dhig xaafaddaada mid amaan ah adigoo ka qayb qaadanaya barnaamijka ilaalinta Xaafadaha, halkaas oo aan wada shaqeyno si loo yareeyo danbiga iyo khalkhalka.

Waa maxay Ilaalinta Xaafada?

Ilaalinta Xaafadu waa iskaashi ka dhaxeeyaa dadka deegaanka iyo booliska / masuuliyiinta degmada. Ilaalinta Xaafada waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo falalka dembiga iyaga oo xaafadaha ka dhigaya kuwo aan soo jiidasho ku lahayn hawsha falka denbiyada. Tani waxaa lagu sameeyaa ka warhayn dheeraad ah oo ay sameynayaan deganayaasha deegaanka maxaliga ah iyo aqoonta si loo qaado tallaabooyinka lagaga hortaggi karo tuugta jabsata guryaha. Ujeedada ugu dambeysa waa in la yareeyo denbiyada oo la kordhiyo ammaankaafaddaada.



Sidee ayuu u shaqeeyaa?

Haddii aad rabto inaad bilowdo Ilaalinta Xaafada ee xaafadaada, ku billow inaad la xiriirto deriskaaga si aad u qiyaasto heerka xiisaha. Ka dibna la xiriir booliska degmadda ama masuuliyiinta degmadda si aad u dhisto aagga Ilaalinta Xaafada.

Qof ayaa loo magacaabi doonaa in uu u shaqeeyo sida xiriirkha u dhexeeyaa dadka deegaanka iyo booliska / masuuliyiinta degmadda.

Deganayaasha waxay ka heli doonaan tababar bilayska / masuuliyiinta degmadda halkaas oo ay ka baran doonaan arrimo la xidhiidha Ilaalinta Xaafadaha, iyo waxyaabo kale, sida Ilaalinta Xaafaduhu u shaqeyso iyo waxyaabaha ugu muhiimsan ee diiradda la saarayo marka laga shaqeynayo horumarinta amniga iyo ka hortagga dembiyada.

Gooloyaasha ka hortagga dembiyada maxaliga ah, adeegyada dabka iyo badbaadinta degmadda, mulkiiliyaasha, ganacsatada, shirkadaha caymiska iwm ayaa sidoo kale ku lug leh tababarka.

Tababarka kadib, bilayska / masuuliyiinta degmadda ayaa bixin doona calaamado iyo warqado si ay u muujiyaan in ay jirto goobta Ilaalinta Xaafada ee deegaanka oo ah mid shaqeynaysa.

Calaamadaha iyo waraaqaha dhejisan waxay tilmaamayaan in dadka deegaanku yihiin:

- ▶ Waxa lagu tababaray Ilaalinta Xaafadaha iyo kahortaga jariimada / dembiyada
- ▶ Inay qaadaan tallaabooyin lagaga hortagayo dembiga
- ▶ Feejignaan dheeri ah
- ▶ Ogaadaan tallaabada la qaadayo haddii ujeedo fal dambila tuhunsan yahay

Shuruudaha ugu hooseeya ee Ilaalinta Xaafadaha

1

Feejignaan

Noqo mid feejigan u sheeg booliska waxkasta oo laga shakiyo

2

Haddii aad tagto

La socodsii deriskaaga haddii aad qorsheyneyso in aad maqnaanayso wax ka badan dhowr maalmood

3

Waxyaabaha qiimaha leh

Ku kaydi alaabada muhiimka ah meel amaan ah

4

Tallaabooyin ka hortag ah

Ka akhri tallooyin ku saabsan tallaabooyinka ka hortagga ah: www.grannsamverkan.se

Tallooyin

Alaabta

Ku hay alaabtoo dhameystiran ayna la socdaan sawirrada / fidiyowyada gurigaaga. Ku kaydi alaabtaada meel ka baxsan gurigaaga. Soo degso shaxan xisaabiyyaha alaabta: www.grannsamverkan.se



Calaamadynta

Alaabta la calaamadiyey waa mid aan soo jiidasho u lahayn tuugada sababta oo ah way adag tahay in la gado. Waxaa intaa dheer, alaabada calaamadeysan waxay u badan tahay in laguu soo celiyo haddii la xado iyadoo si sahlan loo xiri karo tuuga alaabta lagu qabtay ama lagu helay. Calaamadintu waa inay noqotaa mid la heli karo oo ay boolisku ku hayaan diwaannada qaranka ama kuwa caalamiga ah.

Haddii aad aragto
dambi dhacaya

Wac 112

U sheeg booliska

Wac 114 14